



Caymiska Apple Health ee loogu talagalay Kuwa Ka Soo Aflaxay Daryeelka Korsashada

Ma ku nooshahay gobolka Washington?

Ma tahay qof ay da'diisu u dhaxeeyo 18-26?

Ma ku jirtay daryeelka korsashada markay da'aadu ahayd 18?

Haddii aad dhammaan saddexdaba "haa" uga jawaabtey, waxaad xaq u yeellan kartaa caymiska Apple Health (Medicaid) oo bilaash ah oo loogu talagalay Kuwa Ka Soo Aflaxay Daryeelka Korsashada!

Waa maxay Apple Health ee loogu talagalay Kuwa Ka Soo Aflaxay Daryeelka Korsashada?

Apple Health ee loogu talagalay Kuwa Ka Soo Aflaxay Daryeelka Korsashada wuxuu bixiyaa adeegyo lagu taageerayo wanaagga dhimirkaaga, jirkaaga, iyo dareenkaaga. Dhallinyarta ka soo aflaxday waxay kala dooran karaan in ay isku qoraan Daryeelka La Isku-dubarido sida qorshahooda daryeelka loo maareeyo ama caymiska Apple Health iyadoon jirin qorshaha daryeelka la maareeyo (sidoo kale loo yaqaanno lacagta-adeegga).

Ma u baahanahay in aan caymiska codsado?

- Haddii aad daryeelka korsashada markay da'aadu ahayd 18 ugu jirtay gobolka Washington, uma baahnid in aad wax tallaabo ah qaadid. Waxaa lagugu qori doonnaa caymiska Apple Health waxayna maareyn karaan caymiskaaga oo loo marayo **Washington Healthplanfinder**.
- Haddii aad daryeelka korsashada markay da'aadu ahayd 18 ugu jirtay meel ka baxsan gobolka Washington, waxaad codsan kartaa caymiska kuwa ka soo aflaxay adigoo u maraya **Washington Healthplanfinder**.

Sideen u codsan karaa caymiska?

Haddii aadan ku qornayn caymiska Apple Health waxaad haysataa dhowr ikhtiyaarood si aad u codsato:

- **Barta internet-ka:** Booqo **wahealthplanfinder.org** - dooro batoonka "Codso Hadda/Apply Now".
- **App-ka telefoonka gacanta:** Soo degso **App-ka WAPlanfinder**.
- **Telefoonka:** Ka wac Washington Healthplanfinder 1-855-923-4633.
- **Warqad:** Ka soo-degto barnaamijka **hca.wa.gov/health-care-application**.
Shakhsi-ahaan: Caawiyeyaasha degaanka ayaa kaa caawin kara codsashada caymiska caafimaad adigoo bixin wax kharash dheeri ah
 - Hel hage adigoo u maraya linkiga taageerada macmiilka **wahealthplanfinder.org**.

Hubso in Lambarkaaga Dammaanada Bulshada la heli karo oo ka jawaab su'aalaha daryeelka korsashada ee codsiga.



Washington State Health Care Authority

Dheefaha iyo adeegyada

Apple Health ee loogu talagalay Kuwa Ka Soo Aflaxay Daryeelka Korashada wuxuu bixiyaa adeegyada habdhaqanka iyo jirka oo ay ku jiraan adeegyada daaweynta xanuunka isticmaalka maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka. Dheefaha waxaa ka mid ah daryeelka ilkaha, booqashooyinka dhakhtarka ee loogu talagalay adeegyada wanaagga iyo ka hortagga, maareynta cudurka daba-dheeraada, daryeelka caafimaadka degdegga ah, adeegyada shaybaarka, daawooyinka la isu qoro, cusbitaal-dhigista, adeegyada bukaanka ee socodka la xiriira, daryeelka hooyonnimada, iyo adeegyada kale ee uu caymiyo Apple Health.

Wax badan oo ku saabsan adeegyada la caymiyo ka ogow hca.wa.gov/apple-health-services.

Ma guureysaa mise horey ma uga guurtay Washington adiga oo u guuraya gobol kale?

Haddii aad hadda deggan tahay, ama aad qorsheynayso in aad gobol kale u guurto oo aadna jeclaan lahayd in aad oggaato macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada iyo dheefaha, waxaad booqan kartaa: medicaid.gov/about-us/beneficiary-resources/index.html#when2contactstate

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Kheyraadka

- Barta internet-ka: hca.wa.gov/foster-care

Nagala soo xiriir

- Email-ka: fcas@hca.wa.gov
- Telefoonka: 1-800-562-3022 (khadka dheeriga ah 15480)
- Fakis: 360-725-1158

